

2021

Caasimada Seattle – Faa’idooyinka ee Milicsiga

(Shaqaalaha leh Caymiska Faa’idooyinka Deegaanka 77*)

Xaq ulahaanshaha: Shaqaalaha cusub iyo dadka ku tiirsan, caymiska wuxuu bilaanayaa maalintaada koowaad ee shaqada haddii ay taariiqdaas ay tahay maalinta kaleendarka ugu horeysa ee bisha loogu talo galay sida maalinta ganacsiga Caasimada ama maalinta kaleendarka ugu horeysa ee bisha loogu talo galay ama loo aqoonsaday sida maalinta shaqada ugu horeysa ee isbadelka ee mida lagu xilsaaray. Haddii shaqadaada bilaabato taariiqdaan kadib, caymiskaaga wuxuu bilowdaa maalinta koowaad ee bisha xigto.

Dadka ku tiirsan ee Uqalma: Shaqsiyaadka u qalma caymiska waxaa kamid ah xaaskaaga/seeygaga ama lamaanaha qoyska, carruurtaada aad dhashay ama aad soo korsatay ama carruurta lagu meeleyay korsashada, carruurta lamaanahaaga qoyska, carruurta adeerka u tahay, iyo canug walba oo aad si sharci ah mas’uul uga tahay ama lagu faray inuu caymiska lahaado Digreetada Carruurta Loogu Daro Ceymiska Walidkooda ama Mas’uulkooda. Carruurta dadka weyn waxay u qalma caymiska haddii ay ka hooseeyaan da’da 26. Haddii aad ku dartid dadka lagu tiirsanyahay, waxaa lagu weydiinayaa waraaqaha lagu cadeynayo u qalmidooda ee caymiska oo dhinaca qorshooyinka Caasimada Seattle.

Diiwaangelinta: Waa inaad iska diiwaangelisaa 30 maalmood gudahood ee ka bilaabaneysa kireysiga. Haddii aad ku guuldareysatid inaad iskaga diiwaangelisid 30 maalmood gudahood ee taariiqdaada kireysiga, waxaa si toos ah lagaaga diiwaangelinayaa caymiska ilkaha iyo caymiska araga aasaaska. Caymiska ilkahaaga wuu ka guul dareysanayaa qorshaha Delta Dental of Washington. Ku bilaabida kireysayada ka dib Janaayo 2, 2018, haddii aad si cusub ugu qalantid caymiska caafimaadka oo aadan si firfircoon u dooran ama uga dhaafin caymiska caafimaadka, waxaa si toos ah lagaaga diiwaangelinayaa qorshaha kaliya ee shaqaalaha Deegaanka Aetna Ugu badan/Deegaanka Dhaqanka 77, kaas oo aan u baahneyn wax tabarucaad caymiska ah ee adiga kaa imaanayo.

Ilkaha

Waxaad ka dooran kartaa labo qorsho ee ilkaha ah – Delta Dental of Washington ama Dental Health Services. Qorshooyinka ilkaha waxaa ku jiro caymiska ee dadka ku tiirsan ee u qalma. Lacagta caymiska waxaa lagu daboolay si buuxdo Caasimada Seattle.

Araga

Waxaad dooran kartaa qorshaha araga. Baaritaanka indhaha sannadlaha wuxuu ku daboolan yahay kaleendarka sannad walba ee qorshaha.

Caafimaadka

Waxaad ka dooran kartaa Deegaanka 77 ama qorshooyinka Ugu badan/Deegaanka 77. Qarashka bil-laha ee adiga mid walboo qorshooyinka waa:

Qorshooyinka Deegaanka 77

	Tabarucida Lacagta caymiska Bil-laha oo Caymiska
Qorshaha Caafimaadka	Shaqaalaha **
Ka hortaga Aetna	\$204.34
Dhaqanka Aetna	\$209.28
Heerka Kaiser Permanente	\$140.22

Qorshooyinka Ugu badan/Deegaanka 77

	Tabarucida Lacagta caymiska Bil-laha oo Caymiska	
Qorshaha Caafimaadka	Shaqaalaha **	Shaqaalaha ee la jiro xaaska/lamaanaha qoyska*
Ka hortaga Aetna	\$48.12	\$98.50
Dhaqanka Aetna	\$0.00	\$32.34
Heerka Kaiser Permanente	\$48.40	\$99.90

**oo ay la jiraan ama aan la jirin carruur

Akoonada isticmaalka Dabacsan (FSA)

Caasimada waxay bixisaa Daryeelka Caafimaadka iyo Daryeelka Maalinta FSA. Daryeelka Caafimaadka FSA wuxuu kuu ogolaanayaa inaad isticmaashid doolarada canshuurta hore si aad u heshid lacag celinta ee caafimaadka u qalma, ilkaha, iyo qarashaadka araga. qashaadka araga Daryeelka Maalinta FSA wuxuu kuu ogolaanayaa inaad ka heshid lacag celin ee qarashaadka daryeelka maalinta u qalma canugaaga ku tiirsan oo illaa da’da 13, xaaska curyaanka/lamaanaha qoyska, ama waalidka ku tiirsan. Waxaad dooran kartaa ugu yaraan \$120 illaa \$2,700 sannadkiiba ee Daryeelka caafimaadka FSA iyo \$5,000 ee qorshaha Daryeelka Maalinta. Haddii aad dooratid inaad ka qeybqaadashid qorshahaan oo aad rabtid inaad sii wadid ka qeybqaadashadaada, waxaad u baahneysaa inaad dib uga diiwaangelisid sannad walba inta lagu jiro muddada furanta Caasimada.

Stimulus Relief Bill of 2020 (Sharciga Gaargaarka Xoojinta Dhaqaalaha ee 2020) aawadiis, waxaad u wareejiisan kartaa dhammaan lacagaha qorshaha 2021 ee aan la isticmaalin sanadka 2022 inta ay lacag wareejiintu dhalineysa akoon ugu yaraan dhan \$120.

Aasaaska Caymiska Curyaanimada Muddada Dheer

Haddii aad curyaan noqotid, kadib 90-maalmood oo muddada sugitaanta ah, qorshaha ayaa ku siinayo aasaaska faa’idada ee \$400 bishiiba adiga oo aysan kuu suurtoogaleynin inaad shaqeysid. Lacagta caymiska aasaaska curyaanimada muddada dheer waxaa si buuxdo ku bixiyaa Caasimada. Waxaad haysataa iqtiaarka lagu iibsano faa’idooyinka curyaanimada muddada dheer (fiiri hoos).

Dheeraadka Caymiska Curyaanimada Muddada Dheer (Supplemental Long-Term Disability Insurance)

libso dheeraadka caymiska curyaanimada muddada dheer si ay kuu siiso illaa boqolkiiba 60% ee salka mushaarkaaga ee ka badan \$667 illaa ugu badnaan \$8,333 bishiiba.

*Waxaa ku jira shaqaalaha Magaalada oo ay dabooshey Qandaraaska Midawga ee Deegaanka 77 I.B.E.W. (Kuma jiraan shaqaalaha ay dabooshey qandaraasyada Local 77 ee CMEOs, Xirfadlayaasha IT-ga, Maareeyayaasha Alaabta iyo Suuq-geynta Korontada. Eeg Gunnooyinka ugu badan. Halmar isha mari Dheefaha “Ugu Badan”).

Basic Group Term Life Basic Insurance (Caymiska Aasaaska Nolosha Muddada Kooxda Aasaaska)

Waxaad ka dooran kartaa mid ama labo qorshooyinka – Basic Group Term Life Insurance kaas oo ah hal iyo bar waqtiyada daqiiyadaada sannadlaha ama Limited Basic Group Term Life Insurance oo ah \$50,000. Caasimada waxay ku deeqaysaa 40% ee qarashka ee Basic Group Term Life Insurance. Waxaad leedahay iqtiyaarka lagu iibsano Supplemental Group Term Life Insurance (hoos fiiri).

Supplemental Group Term Life Insurance (Caymiska Nolosha Muddada Kooxda Dheeraadka ah)

Haddii aad dooratid Basic Group Term Life, waxaad iibsano kartaa caymiska muddada nolosha la dheeraadka ah nafsadaada, xaaska/lamaanaha qoyska, iyo carruurta. Lacagta ugu badan ee caymiska nolosha ee lagu heli karo adiga ayaa ah afar jibaar daqliga sannadlaha, mida xaaskaaga/lamaanaha qoyskaaga waxay lamid tahay 100% lacagta caymiska ee aad u dooratay nafsadaada ilaa iyo ugu badnaan \$50,000, iyo \$2,000, \$5,000 ama \$10,000 oo loogu talagalay canuga (carruurta).

Dhimashada Shilka iyo Xubin go'a Caymiska (AD&D)

Waxaad iibsano kartaa caymiska AD&D ee nafsadaada, ama adiga iyo qoyskaaga. Caymiska waxaa lagu heli karaa ka bilow \$25,000 illaa \$500,000.

Shaqo ka fariisiga

Shaqo ka fariisiga Shaqaalaha Caasimada Seattle Nidaamka (SCERS I iyo II)

Waxaa jiro labo qorshooyinka shaqo ka fariisiga ee shaqaalaha Caasimada, taas oo si muhiim ahaan u shaqeeyo sida lamidka ah qaar ka mid ah kala duwanaanshaha ee tabarucada, da'da shaqo ka fariisiga ugu weyn, isku celcelis mushaarka ugu dambeeyo, iyo faa'idada la helay sannadkiiba ee adeega badan.

SCERS I (la kireystay ama iska diiwaangeliyay ka hor Janaayo 1, 2017): Waxaad ku tabarucday 10.03% iyo Caasimada sidoo kale waxay bixisaa 15.29% ee mushaarkaaga ah ee dhinacyada shaqo ka fariisigaaga.

SCERS II (la kireystay Janaayo 1, 2017 ama ka dambeeyso): Waxaad ku tabarucday 7.0% iyo Caasimada sidoo kale waxay bixisaa 14.42% ee mushaarkaaga ah ee dhinacyada shaqo ka fariisigaaga.

Tabarucada iyo daqiiyada canshuurta dib loogu dhigay. Waxaad 100% ku ilaalsantahay tabarucidaada iyo daqiiyadooda. Waxaad noqotay mid ilaalsan (u qalma faa'idada bil-laha ee da'da shaqo ka fariisiga) oo adeega shan sanno ah. Haddii aad ka tagtid shaqada Caasimada ka hor shaqo ka fariisigaaga iyo ka laabashada tabarucidaada, uma qalmeysid wax ka mid ah tabarucidaada Caasimada.

Haddii aad u shaqeysay gobolka ama dowladaha kale ee deegaanka, waxaad u qalmi kartaa inaad isugu geysid waqtigaaga adeega si aad ugu qalantid shaqo ka fariisiga.

Waxaad leedahay iqtiyaarka aad ku keydineysid wax ka badan shaqo ka fariisigaaga illaa City's Voluntary Deferred Compensation Plan (hoos fiiri).

Voluntary Deferred Compensation Plan (Qorshaha Magdhowga Dib loo dhigay ee Qitiyaarka ah)

Isdiiwaangalinta Magaalada qorshaheeda 457 ee magdhowga raaga waa tabaruc. Waxaa lagu ogolyahay inaad ku deeqdid illaa ka jaridaha jornaatiga. Waxaad go'aansatay tirada

doolarka, nooca tabarucada iyo noocyada maalgashiyada. Waxaad ku deeqi kartaa sida yar ee \$10 jeeg walboo lacag bixin ah. Iska diiwaangeli iyo isbadelada tabarucada waxaa la sameyn karaa xili walba. Caasimada isma barbardhigto tabarucidaada.

Shaqada/Barnaamijyada Nolosha iyo Faa'idooyinka

Barnaamijka Caawinta Shaqaalaha (Employee Assistance Program EAP)

EAP waa adeeg gudbin iyo la talin ah ee adiga iyo xubnaha qoyskaaga. Hel caawinta qarsoodiga ee arimaha shaqiga ah sida istireeska, niyad jabka, dhibaatooyinka qoyska iyo xiriirka, iyo la talinta dhaqaalaha. Xubinta qoys walba wuxuu u qalmaa lix hal saac oo kulamo bilaash ah sameynta sannadkiiba.

Gaadiidka

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho Kaarka Baasaboorka ee ORCA, kaas oo lagu bixiyo dhamaan lacagaha safarada dhulka ah, oo ay ku jiraan doonta lacagta lagu raaco iyo Doonta Kitsap Fast. Vanpool iyo Doonta Gobalka WA ee loogu talagalay rakaabka kaliya ayaa sidoo kale u qalmi kara. Haddii aad isticmaashid nidaamka gaadiidka, safarka baabuurka, iyo/ama mooto aad ku shaqeysid, waxaad sidoo kale u qalantaa racida guriga oo la damaanad qaaday – raacitaanka taksiga guriga ee la lacag celiyay ee dhacdada degdega qoyska iyo caafimaadka.

Baarista Shaqada

Career Quest waxay bixisaa fursadaha hormarinta shaqada la habeeyay si ay u balaariso xirfadahaaga ama aad raadisid caawinta ee hadafyadaada shaqada muddada dheer. Barnaamijku waxa uu bixiyaa tababarid xirfadeed iyo siminaaro. Si aad ugu qalantid, waa inaa dahaataa shaqaalaha Caasimada oo joogto ah, ka shaqeysay ugu yaraan hal sanno, oo aad balanqaaday inaad hormarisid xirfado cusub iyo aqoon.

Fasaxyada

Caasimada ayaa kormeerto 10 fasaxyada rasmiga ah iyo 2 fasaxyada shaqiga ah. Waxaad qaadan kartaa fasax waqti walba oo ay la jirto ansixinta kormeeraha.

Fasax

Waxaad isu keentay fasaxa ku saleysan saacadaha heerka lacag bixinta joogtada ah. Tirada fasaxa la helay waxay ku xirantay baaxada adeegaaga—ka bilow 12 maalmood sannadkii oo shaqaalaha cusub illaa 30 maalmood sannadkii kadib 29 sanno oo shaqo ah. Saacadaha fasaxa aan la isticmaalin ee la sameeyay sannad walba kadib, illaa ugu badnaan.

Fasaxa Jirada

Waxaad isu keentay fasaxa jirada ee ku saleysan tirada saacadaah joogtada ah ee la shaqeeyay. Shaqaalaha waqtiga buuxo waxay helaan 96 saacadood ee fasaxa jirada sannadkiiba. Waxaad qaadan kartaa fasaxa jiradaada aan la isticmaalin, ma jiraan isku darka ugu badan.

Fasaxyada kale

Caasimada waxay sidoo kale bixisaa fasaxyada soo socda ee lacagta leh iyo kuwa aan lacagta lahayn: fasaxa waalidnimada ee lacagta leh, fasaxa tacsida, fasaxa qoyska iyo caafimaadka, curyaanimada uurka, waajibada maxkamada, fasaxa waajibada milatariga, fasaxa xubin deeqaha, fasaxa shaqsiyeed ee aan lacagta lahayn iyo fasaxa borofeesarka.

Waxaa la cusbooneysiiyay 3/3/2021



Seattle
Human Resources